

**Information for Respondent in a Domestic Abuse Case**  
**Macluumaadka Dacweysanaha Kiis ah Tacaddiyada Qoyska Gudihisa**

If you are served with these papers, someone is asking for or has received an Order for Protection (OFP) against you.

Haddii lagu keeno waraaqahaas, qof ayaa codsaday ama la siiyey waraaqda Amaraka Difaacidda ah (OFP) oo adiga kaa dhan ah.

A. An OFP may be brought by [Minn. Stat. § 518B.01, subd. 4(a)]:

Waraaqda OFP waxa laguugu keeni karo waa [Sharciga Minn. Stat. § 518B.01, subd. 4(a)]:

- a family or household member on their own behalf;  
xubin qoys ka tirsan ama guri kugula nool oo naftooda u hadlaya;
- a family or household member, a guardian, or a reputable adult age 25 or older on behalf of a minor, or  
xubin qoys ka tirsan ama guri kugula nool, masuul ilmo, qof weyn oo sumcad leh oo jira 25 ama ka weyn oo u hadlaya ilma yar, ama
- a minor age 16 or 17 against a spouse, former spouse, or person with whom the minor has a child, if allowed by the court.  
ilma yar oo jira 16 ama 17 oo ka dhan ah qof ay hadda isu-dhaxeen, mar hore isu-dhaxeen, ama ay ilma ka dhaxeeyaan, haddii maxkamaddu u oggolaato.

B. **Definitions (Minn. Stat. § 518B.01, subd. 2)**

**Qeexid (Sharciga Minn. Stat. § 518B.01, subd. 2)**

**Domestic Abuse** is defined as any of the following conduct between family or household members:

**Tacaddiyada Qoyska Gudihisa** waxaa loo qeexaa wax kasta oo ka mid ah habdhaqanka soo socda oo dhex mara qoys ama xubno guri ku wada nool:

1. Actual physical harm, bodily injury, assault (such as hitting, kicking, slapping, pushing, stabbing), or fear of imminent physical harm, bodily injury or assault (such as verbal threats, threatening gestures); or  
Waxyeeello dhab ah oo jirka loo geysto, dhaawac jirka ah, gacanqaad (sida jug, haraanti, dharbaaxo, riixid, mindiyeyn), ama cabsi joogto in ay ku dhaceyso, in qof la gaarsiiyo waxyeelleeyo oogadiisa, dhaawac jirka ah, ama gacanqaad (sida hanjabaad afka ah, baaqyo hanjabaadeed); ama
2. Terroristic threats (such as a threat to commit a crime of violence, bomb threats, or threatening someone when holding a gun); or  
Hanjaaado argaggaxin ah (sida in la sameyn doono danbi gacanqaad ah, hanjabaado banbo ah, in bistoolad qofka lagu qabanayo); ama

3. Criminal sexual conduct (such as forced sex or forced sexual contact with an adult or any form of sexual contact with a child); or  
Ficil denbi galmo ah oo la sameynayo (sida galmo khasab ah ama ficil galmo la xiriira oo lagu khasbo qof weyn ama nooc kasta oo ay ahaataba galmo lagula kaco ilmo); ama
4. Interference with an emergency call (intentionally interrupts, disrupts, impedes or interferes with an emergency call or intentionally prevents or hinders another from placing an emergency call.)  
Carqaleynta taleefanka xaaladaha degdegga ah (arbushaad ulakac ah, rabshadeyn, joojinta ama carqaladeynta taleefanka xaaladaha degdegga ah ama in si ulakac ah looga hortago ama qof looga xannibo in uu dirsado taleefanka xaaladaha degdegga ah.)

**Family or household members** are defined as:

**Xubno qoys ah ama guri ku wada nool** waxaa ah:

1. Married persons/Dad xaas ah;
2. Persons who were married but are now divorced;  
Dad xaas ahaan jiray, laakiin hadda kala tagay;
3. Parents, children/Waalid, carruur;
4. Persons related by blood (such as brothers, sisters, uncles, aunts, or grandparents);  
Dad qoyska koowaad isku ah (sida walaalo ah wiilal, gabdho, eeddo ama habaryar, adeer ama abti, ama awoowe/ayeeyo);
5. Persons who live together now or who lived together in the past;  
Dad hadda isku meel ku wada nool, ama beri hore isku meel wada noolaan jirey;
6. Persons who have a child together, even if they have not been married or lived together;  
Dad ay ilma ka wada dhaxeeyaan, xataa haddii aysan is guursan ama aysan wada-noolaansho dhex marin;
7. Persons who have an unborn child together;  
Dad filaya ilma uur ugu jira oo aan weli dhalan;
8. Persons involved in a significant romantic or sexual relationship.  
Gashaan uu ka dhaxeeyo jacayl saa'id ah ama xiriir galmo ah.

- C. You have a right to a hearing. If no hearing is scheduled and you want a hearing, you must request one within 5 business days of when you received these documents. To ask for a hearing, fill out and file the “*Request for Hearing*” form (OFP202, available online at <http://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=17&f=321>) with court administration in the county where this case was filed.

Waxaad xaq u leedahay dacwad-dhageysi. Haddii aan lagu qaban ballan adigoo raba dacwad-dhageysi, waa inaad adigu ku soo codsato 5 cisho gudahood marka aad waraaqaha hesho. Si aad u soo codsato dacwad-dhageysi, soo buuxi oo soo gudbi “*Codsiga Dacwad-dhageysiga*” foomka (OFP202, oo aad ka heleyso intarnetka <http://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=17&f=321>) maamul maxkamadeed deegaanka kiiskan laga xareeyey.

Court administration’s address is found on the “*Notice of Filing of Order.*” You can also find it online starting at <http://mncourts.gov/Find-Courts.aspx>.

Cinwaanka maamulka maxkamadda waxaad ka heleysaa “*Ogeysiiska Codsiga Amarka.*” Waxa kale oo aad ka heli kartaa intarnetka <http://mncourts.gov/Find-Courts.aspx>.

- D. If you move, you must let court administration know your new address. Haddii aad guurto, waa khasab inaad u soo sheegto maamulka maxkamadda cinwaankaaga cusub.

**NOTE: If a hearing is scheduled and an emergency arises and you are unable to attend the hearing, you must contact the court and ask for a new court date. A judge will decide whether to grant your request. If you do not attend a scheduled hearing, the court may grant the Order for Protection (OFP) against you.**

**OGOW: Haddii lagu ballamiyo dacwad-dhageysi balse ay ku qabsato xaalad degdeg ah oo aadan imaan karin dacwad-dhageysiga, waa khasab inaad la soo xiriirto maxkamadda si aad uga codsato taariikh cusub in lagaaga dhigo. Garsoore ayaa go’aamin doona haddii codsigaaga la aqbali doono. Haddii aad imaan weydo ballan ah dacwad-dhageysi oo lagu qabtay, maxkamadda waxay bixin kartaa waraaq ah Amarka Difaacidda (OFP) oo adiga kaa dhan ah.**

Do you have a question about court forms or instructions?

Su'aal ma ka qabtaa foomamka ama habraacyada maxkamadda?

- Visit [www.MNCourts.gov/SelfHelp/Booqo](http://www.MNCourts.gov/SelfHelp/Booqo) [www.MNCourts.gov/SelfHelp](http://www.MNCourts.gov/SelfHelp)
- Call the MN Courts Self Help Center at (651) 435-6535  
Soo Garaac Taleefanka Xarunta Adigu Caawi Naftaada ama Self-Help Center (651) 435-6535
- Domestic Abuse and OFP Help Topic:  
<http://mncourts.gov/Help-Topics/Domestic-Abuse-and-Harassment.aspx>  
Caawimaadda Mowduuca Tacaddiyada Qoyska Gudihis a:  
<http://mncourts.gov/Help-Topics/Domestic-Abuse-and-Harassment.aspx>

Not sure what to do about a legal issue or need advice?

Marka aadan hubin waxa aad ka yeeleyso arrin sharci ah ama aad talo u baahan tahay?

- Talk with a lawyer/Kala hadal qareen
- Visit [www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx](http://www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx)  
Booqo [www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx](http://www.MNCourts.gov/Find-a-Lawyer.aspx)

Helpful materials may be found at your public county law library. For a directory, see <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp> . For more information, contact your court administrator or call the Minnesota State Law Library at 651-297-7651.

Waxyaabo la akhriyo oo ku caawinaya waxaad ka heleysaa maktabadda dadweynaha ee degmadaada ee arrimaha sharciga. Arrimaha diiwaanka, eeg <http://mn.gov/law-library/research-links/county-law-libraries.jsp> . Wixii faahfaahin dheeraad ah, kala xiriir maamulka maxkamadda ama soo garaac maktabadda Minnesota State Law Library taleefankooda 651-297-7651.